

Välkommen till fritids ...

Ku soo dhowoow dugsiga firaaqada ee ...

Telefonnummer	Lambarka teleefanka
----------------------	----------------------------

Fritids	Dugsiga firaaqada ee Iswidhan
<p>Fritids är till för barn mellan 6och 12 år vars vårdnadshavare arbetar, studerar eller är arbetssökande. Barnens tid på fritids styrs av vårdnadshavarnas arbets- och/eller studietid samt restider till och från verksamheten. Fritids har ingen skolplikt det vill säga att man enligt lag inte behöver skicka sina barn på fritids.</p>	

<p>Dugsiga firaaqada waxaa loogu talo galay ilmaha da´doodu u dhexayso 6 ilaa 12 sano oo waaridkood shaqeeyo, waxbarasho ku jiro ama shaqa raadis ku jiro. Inta ilmuhu joogayo dugsiga firaaqada waxay ku xiran tahay hadba inta waaridku shaqaynayo ama/iyo xilliga waxbarashada uu ku jiro, iyo saacadaha safarku qaadanayo. Dugsiga firaaqadu maahan wax sharciga iskoolku dhigayo taasoo loola jeedo in aysan khasab ahayn in ilmaha dugsiga firaaqada la geeyo.</p>
<p>Fritids har en egen läroplan där det står om den värdegrund och det uppdrag fritids har.</p>
<p>Dugsiga firaaqadu wuxuu leeyahay manhaj u gaar ah oo leh qiimayntiisa barbaarineed iyo hawsha dugsigu fuliyo</p>

<p>På fritids ska barnen ha roligt känna sig trygga och lära sig nya saker. Vi sjunger, läser böcker, målar, bygger och konstruerar, samtalar och leker både inom-och utomhus. Ibland gör vi utflykter till skogen eller biblioteket.</p>
<p>Waa in carruurtu ku helaan dugsiga firaaqada madadaalo, amaan ku dareemaan iyo inay bartaan waxyaabo cusub. Waan u heesnaa, buugaag ayaan u akhrinaa, wax baan la rinjinaa, la dhisnaa waxyaalo laysku dul dhisayo, waan la sheekaysanaa, waxaan kula cayaarnaa dugsiga gudhiisa iyo dibaddiisa. Marmar waxaan geynaa dhirta dhexdeeda ama maktabadda.</p>

Inskolning	Marka la bilaabayo
<p>När barnet ska börja i fritids kallas den första tiden för inskolning. Under den tiden är du som förälder med på fritids. Syftet med inskolningen är att barnen och föräldrarna ska lära känna verksamheten och bli trygga med fritids miljö, pedagoger och de andra barnen. Varje fritidshem har egna rutiner för inskolning på fritids.</p>	

Wakhiga ugu horraysa oo ilmuhu bilaabayo dugsiga firaaqada waxaa la yiraahdaa dugsii bilow. Wakhtigaas isaga ah waa in ka waalid ahaan aad la joogtaa ilmahaaga dugsiga firaaqada. Ujeeddaduna waa in ilmaha iyo waalidiintu wax ka ogaadaan hawlaha dugsigu hayo iyo inay amaano iyo nefis ku dareemaan bey'adda(goobta), barayaasha iyo carruuta kale ee meesha joogta. Dugsi walba wuxuu leeyahay qaab uu u maamulo sida ardayga bilaabaya loo qaabilayo.

En dag på fritids

Jadwal maalmeedka dugsiga firaaqada

..... Fritids öppnar på avdelningen.....
Frukost
 Aktiviteter inne och ute
 skolan börjar.
skolan slutar.
 mellanmål.
 Aktiviteter inne eller ute
 Fritids stänger på avdelningen....

.....Dugsiga ayaa la furayaa Qaybta.....
Quraac
Cayaar gudaha iyo dibedda
Iskuulka ayaa la aadayaa
Iskuulka ayaa laga imanayaa
Casariye/nusasaace
Cayaar gudaha ah ama dibedda
Dugsiga firaaqada waa la xirayaa qaybta.....

Hämtning/går hem själv

In ilmaha la kaxaynayo ama keligiis tegayo

När vårdnadshavare har slutat för dagen kommer hen och hämtar sitt barn från fritids. Barnet kan även få gå hem själv om fritids och vårdnadshavare kommit överens om detta i förväg. När du hämtar ditt barn måste du säga till personalen att ni går.

Mitt barn går hem från fritids själv Jag hämtar mitt barn från fritids

Det är viktigt att fritids vet vilka personer som får hämta ditt barn på fritids.

De här personerna får hämta mitt barn från fritids:.....

Marka waalidku hawl maalmeedkiisa soo dhammaysto ayuu ilmihiiisa ka kaxaysanayaa dugsiga firaaqada. Xataa Ilmuhu keligiis waa aadi karaa guriga haddii waalidka iyo shaqaaluhu isku af gartaan.

Markaad kaxaysanaysid ilmahaaga waa inaad shaqaalaha u sheegtaa.

Ilmahaygu guriga keligiis ayaa aadi karaa Aniga ayaa kaxaysanaya ilmahayga

Waxaa kaloo muhiim ah in shaqaaluhu ogaado haddii qof kale ilmahaaga soo kaxaynayo. Dadkaan ayaa ilmahayga ka soo kaxayn kara dugsiga firaaqada.....

Du ska ringa till fritids om ditt/dina barn är sjukt, ska vara ledig eller om tiderna ändras.

Om ditt barn ska följa med en kompis efter skolan måste du meddela fritidspersonalen.

Waa inaad wacdaa dugsiga firaaqada haddii ilmahaagu xanuunsan yahay, hadduu fasax gelayo ama haddii wakhtigiisu isbeddelo.

Haddii ilmahaagu uu saaxiibkiis u raacayo guriga ama meel kale waa inaad shaqaalaha ku soo wargilisaa.

Kläder på fritids

Dharka looga baahan yahay dugsiga firaaqada

Det behövs flera ombyten av kläder som är hela, rena och passar i storlek.

Waxaa loo baahan yahay in ilmaha loo soo dhigo dhowr beddel oo dhar ah oo aan jeexnayn, nadiif ah oo le'eg ilmaha.

Barnet behöver kläder för att kunna vara ute i alla slags väder även när det regnar eller är kallt.

Ilumuhu wuxuu u baahan yahay dhar la gashado si uu bannaanka ugu bixi karo jawi kasta oo jira xataa haddii roob da'ayo ama ama xilliga barafka.

Barnets kläder ska vara märkta med deras namn

Ilmaha dharkiisa ku soo calaamadee magaciisa.

Se särskilt dokument om kläder

Fiiri qoraallada khaaska ah ee ku saabsan dharka

Tystnadsplikt

Mas'uuliyadda xafidka sirta

Vi som arbetar på fritids har tystnadsplikt, vi berättar inte vidare för andra det vi hör från dig eller ditt barn, så länge det inte rör ditt barns säkerhet

Annaga ka shaqayna dugsiga firaaqada xil ayaa naga saaran inaan xafidno sirtaada, cid kale uma sheegi karno waxyaalaha aad noo sheegtid ee ku saabsan ilmahaaga, haddaysan ahayn wax ilmahaaga ammaankiisa ku saabsan.

Fritids har anmälningsplikt om vi ser att något barn far illa. Detta innebär att om vi ser ett barn fara illa, måste vi berätta för myndigheter så att vi tillsammans kan lösa svårigheter i situationer.

Shaqaalaha waajib ayaa ka saaran inay gudbiyaan hadday arkaan in ilmaha naftiisu khatar ku jirto. Taasoo macnaheedu yahay in haddii aan aragno ilmo naftiisu khatar ku jirto, waxa nagu waajiba inaan u gudbino hay'adaha dawliga ah si aan anagoo wada jirna u xallino dhibaatooyinka iyo xaaladaha jira.

Samarbete med hemmet

Wada shaqaynta dugsiga firaaqada iyo guriga

Du som förälder är viktig för vårt arbete i fritids. Det är viktigt att du berättar för oss om det hänt något särskilt som kan vara bra för personalen att veta

Ka waalid ahaan muhiim ayaad noo tahay. Waxaa aad muhiim u ah inaad noo sheegtid haddii ay jiraan dhacdooyin khaas ah oo ay tahay in shaqaaluhu ogaadaan.

Det är viktigt att du berättar för personalen om det är något du funderar över. Fråga gärna både oss och ditt barn vad de gjort under dagen i fritidsen.

Waa muhiim inaad shaqaalaha la socodsii sid haddii ay jiraan waxaad isweydiineysid. Haddaad su'aal qabtid na weydii ilmahaagana weydii waxay maanta sameeyeen markay joogeen dugsiga firaaqada.

Sjukdomar	Jirrooyin
Om ert barn är sjukt ska det stanna hemma. Barnet måste orka vara med i verksamheten både ute och inne.	
Haddii ilmahaagu xanuunsado waa inaad guriga ku haysid. Ilmuhu markuu dugsiga firaaqada joogo waa inuu ka qayb qaadan karo cayaaraha dibedda iyo kuwa gudahaba.	
Om ert barn har kräkts eller haft diarré behöver barnet vara hemma symptomfri i minst 48 timmar.	
Haddii ilmahaagu uu matagayo ama shuban hayo waa inaad guriga ku haysaa ugu yaraan 48 saacadood ka dib marka shubanka/mataggu ka joogsado.	
Om ert barn har haft feber behöver barnet vara hemma minst en dag feberfri	
Haddii qandho/xummad qabatay ilmaha waa inuu guriga joogaa ugu yaraan hal maalin ka dib marka qandhadu/xummadu ka degto.	

Övrigt	Wixii intaas dheer
Tänk på att inte använda starka parfymer då det finns barn och personal som kan vara allergiska mot starka dofter	
Xusuusnow inaad isticmaalin cadar ama barafuun adag maadaama ay jiraan carruur iyo shaqaale qaba xasaasiyad oo ay dhibto urta ama carafta xoogga badan.	

Lov	Fasaxyada
När det är lov är skolan stängd och då kan ditt barn vid behov vara på fritids. Innan ett lov får du fylla i en lapp om vilka dagar och tider ditt barn behöver vara på fritids.	
Marka iskuulku xiran yahay fasaxyada wuxuu ilmahaagu haduu u baahdo joogi karaa dugsiga firaaqada. Intaan fasaxa la gaarin ayaad buuxinaysaa foom ay ku qoran tahay maalmaha iyo saacadaha uu ilmuhu u baahan yahay inuu joogo dugsiga firaaqada.	
Fritids stänger 3-4 dagar varje år då personalen har fortbildning	
Sannadkiiba 3-4 goor ayaa la xiraa dugsiga firaaqada, waqtiyadaas oo shaqaaluhu ay leeyihiin waxbarasho horumarin ah.	

Special kost.....	Cunto gaar ah.....
Om ditt barn har specialkost måste du meddela personalen om detta.	
Haddii ilmahaagu uu cuno cunto gaar ah waa inaad u sheegtaa shaqaalaha.	

Uppsägning av fritids.....	Booska oo la fasaxo.....
Om du och din familj flyttar från kommunen måste du säga upp din fritidsplats. Meddela rektorn.	
Haddii aad ka guuraysaan magaalada waa inaad fasaxdaa booska ilmahaagu ku leeyahay dugsiga firaaqada. Ku wargeli maalulaha dugsiga in aad fasaxaysaan booska.	

Taxa	Qiime go'an
Det kostar pengar att ha sitt barn på fritids. Fram till det att du får en inkomst från ett arbete är det dock gratis med fritids därefter betalar du en avgift.	
Lacag ayaa laga bixiyaa in ilmuhu tago dugsiga firaaqada. Laakiin illaa iyo intaad ka helaysid shaqo aad mushahaar ka qaadatid wuxuu ilmahaagu ku dhiganayaa lacag la'aan, ka dib ayaad bixinaysaa qiime go'an.	
Kontaktuppgifter	Macluumaadka xiriirka
Det är viktigt att fritids har aktuella telefonnummer till vårdnadshavare så att de kan nå dig om det händer något. Ange även nummer till en annan närstående vuxen om fritids inte får tag på vårdnadshavare.	
Waa muhiim in shaqaalaha ay haystaan lambarka taleefanka ee waalidkua si haddii ay wax dhacaan loola soo xiriiro. Waa inuu jiraa lambar qof kale oo weyn oo qaraabo ama saaxiib ah si loo soo wici karo haddii la heli waayo waalidka.	